

Warbixin muhiim ah oo ku saabsan

LEGIMUS

SOMALISKA

Warbixin muhiim ah oo ku saabsan Legimus

Haddaad leedahay naafonimo adkaynaysa akhriska qoraallada daabacan waxaad xaq u leedahay inaad buugaagta ku hesho hab adiga kugu habboon. Hay'adda warbaahinta la haleelo (MTM) ayaa u xilsaaran inay taas suurto geliso. Sidaas darteed ayay u jirtaa maktabadda dijitaalka ah ee Legimus.

Qawaaniinta waxay khuseeyaan amaahda iyo akhrinta buugaagta Legimus:

- Isticmaalka Legimus waxaa loo oggol yahay oo keliya dadka sidaada oo kale leh naafonimo adkaynaysa akhriska qoraallada daabacan.
- Waa inaad bixiso xog sax ah oo ku saabsan waxa ugu wacan inaad u baahan tahay isticmaalka Legimus. Haddaad si ula kac ah u sheegto xog khaldan waxaad waayi kartaa xuquuqda isticmaalka adeegga.
- Dad kale lama oggola inay isticmaalaan xogta gelitinkaaga si ay u buugaagta uga akhristaan Legimus. Hadday taasi dhacdo waxaa dhici karta in lagaa xiro akawinkaaga Legimus.
- Buug la soo dejistay waa amaah. Lix bilood ka dib adiga qudhaada ayay tahay inaad iska saarto faylasha.
- Waa sharcidarro in dad kale laga iibiyo ama loo sii gudbiyo buugaagta Legimus.
- Haddaad guurto ama waxbarashada joojiso waa inaad u baddelato maktabad cusub ee ku taal halka aad hadda deggan tahay ama aad wax ka baranaysa. Maktabadda cusub waxay kaa caawimaysaa sida aad isticmaalka Legimus u sii wadan lahayd.

Wixii faahfaahin ah oo ku saabsan shuruucda iyo qawaaniinta jira ka akhriso heshiiska isticmaalka.

